CogAT® Dulmarka *CogAT* ee Waalidiinta

Dulmarka *CogAT* ee Waalidiinta



Waa maxay *Imtixaanka Kartiyada Garashada* (*Cognitive Abilities Test*™) (*CogAT*®)?

Kartida garashada waxaa lagu macneeyaa diyaargarowga ardayga uu leeyahay in uu wax ku barto xaalado iyo bey'ado kala duwan oo uu muujiyo xirfadaha xallinta mashaakilka. Si ka duwan imtixaankii guusha dhaqameed, kaas oo cabbira sida ugu wanaagsan ee ardaygu u fahmay manhajka, *Imtixaanka Kartiyada Garashada* (*CogAT*) ayaa ina tusinaya sida ugu wanaagsan ee cunuggu u sababeyn karo oo uu u aqoonsan karo naqshadaha iyo xidhiidhada adduunka ee isaga ku xeeran.

CogAT waxay ku cabbirtaa sababaynta saddex meelood, oo sidoo kale loo yaqaan baytariyo, kuwaas oo ku salaysan siyaabaha ugu muhiimsan ee ardayda iyo macallimiintu ugu wada xidhiidhaan fasalka: **Hadal,** **Aan Hadal Aheyn,** **iyo Tiro.**

Jaantuuska 1 wuxuu muujinayaa noocyada walxaha laga heli karo baytari kasta oo *CogAT* ah.

Jaantuuska 2 wuxuu muujinayaa shay muunad ah oo laga soo qaatay imtixaan hoose oo kasta (heerka fasalka labaad).

Jaantuuska 1


Noocyada Sababeynta ee la Qiimeeyay

V – HADAL	> Isbarbardhigyada > Dhammaystirka Jumladda > Kala-soocidda	**EREYADA**
Q – TIRADA	> Isbarbardhigyada > Taxanayaasha Lambarka > Isla'egyada	**LAMBARRADA**
N – AAN HADAL AHEYN (SABABEYNTA SAWIRKA)	> Isbarbardhigyada > Kala-soocidda > Xaashi Laalaabidda	**SAWIRRADA, NAQSHADAHA, & NIFAASKA**

©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.

Jaantuuska 2

Hadal – Isbarbardhigyada Sawirka





○ ○ ○

Hadal – Kala soocidda Sawirka





○ ○ ○ ○


Hadal – Dhammaystirka Jumladda (ma sawirna)

©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.

Jaantuuska 2 *Sii socda*

Tiro – Isbarbardhigyada Sawirka

1






○




○



○

Tiro – Halxiraalaha Lambarka




2 ○


3 ○

4 ○

6 ○

Tiro – Taxanayaasha Lambarka






○ ○ ○


©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.

Jaantuuska 2 *Sii socda*


Aan Hadal Ahayn – Matrices-ka Jaantuuska



Aan Hadal Ahayn – Kala soocidda Jaantuuska



Aan Hadal Ahayn – Xaashi Laalaabidda




©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.

Ka dib sameynta *CogAT*-ka buuxa, arday kastaa wuxuu helayaa *Astaanta Kartida*–koodh fudud oo soo koobaya kartiyaha garashada ee ardayga. Dukumentigani wuxuu kaa caawin doonaa inuu tarjumo Astaanta Kartida, fahamka waxa xogta kartida tahay, iyo sida loo isticmaali karo.

Turjumaada *Astaanta Kartida*

Arday kasta oo buuxiya tirada ugu yar ee sheyasha *CogAT*-ka buuxda waxa uu helayaa koodhka *Astaanta Kartida* sida midkaan:



Astaantan Kartida waxay ka caawin kartaa macalimiinta inay la qabsadaan baahida ardayga, ka caawiyaan waalidiinta inay ku taageeraan caruurtooda guriga, iyo inay siiso ardayda faham wanaagsan oo ku saabsan waxbarashadooda. Qaybaha soo socdaa waxay sharraxayaan sida loo fasiro qayb kasta oo ka mid ah astaanta.

Heerka

Astaanta Kartida CogAT ee kasta waxay ku billaabataa lambar matalaya stanine-ka da'da dhexdhexaadka ah ee ardayga. Tani waxay muujineysaa heerka guud ee kartida sababeynta ardayga marka loo eego ardayda kale ee da'diisa ah. Stanine waxaa laga soo gaabiyay "standard nine." Magaca ayaa ka yimid xaqiiqda ah in dhibcaha stanine ay u dhexeeyaan hoos oo ah 1 illaa 9 oo ah sare.

Turjumaada Heerka Stanine

Heerka	Tilmaanta
1, 2, 3,	ka hooseeya celceliska
4, 5, 6,	celceliska
7, 8,	ka sarreeya celceliska
9	aad u sarreeya

Imtixaanku waxa uu isticmaalaa muunada guud ee natiijooyinka imtixaanka (oo loo yaqaanno "caadiga qaranka") si loo xisaabiyo buundooyinka. Ardayda waxaa laisugu geeyaa da'da farqiga hal bil laga billaabo 4 sano 11 bilood illaa 18+ sano. Haddii cunuggaaga gaaroo celcelis ahaan buundada stanine-ka (4-6), imtixaanku waxa uu tilmaamayaa in ay sameeyeen qiyaas la mid ah ardayda kale ee da'dooda ah ee imtixaanka galay. Haddii ilmuhu gaadho dhibco stanine ah oo ka sarreeya celceliska (7-9), way ka fiicnaayeen ardaydii kale ee imtixaanka gashay. Stanine ka hooseeya celceliska (1-3) macneheedu waa in cunuggu ka hooseeyo ardayda kale ee da'diisa ah ee imtixaanka gashay.


Eeg **jaantuuska 3** si aad u hesho muuqaal muujin ah:

©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.

Jaantuuska 3

Stanine-ka Dhexdhexaadka ah ee Heerka Kartida Sababeynta

Qaybinta Caadiga ah ee Dhibcaha



Dhibcaha stanine-ka	1	2	3	4	5	6	7	8	9
Soo noqnoqoshada	4%	7%	12%	17%	20%	17%	12%	7%	4%
Fasirka	Aad u hooseeya	Ka hooseeya celceliska		Celceliska			Ka sarreeya celceliska		Aad u sarreeya

Naqshada

Stanine-ka dhexdhexaadka waxaa ku xiga xaraf tilmaamaya *naqshada* buundooyinka cunuggaaga. Nashqada waxay muujineysaa in saddexda buundooyin ee baytariga ay caadiyan u siman yihiin ama dhibcaha qaar ay aad uga sarreeyaan ama uga hooseeyaan buundooyinka kale. Nashqada waxaa loo kala saaraa sida astaanta A, B, C,
ama E midkood.

Naqshada	Faahfaahinta	Qiyaasta boqolkiiba ardayda leh astaantan
A	Dhibcaha baytariga Hadalka, Tirada iyo Aan Hadalka aheyn ee ardayga qiyaas ahaan waa isku heer	44%
B	Laba ka mid ah buundooyinka ayaa qiyaas ahaan isku mid ah. Dhibcaha saddexaad waa yara xoog ama daciifnimo, si aad ah uga sarreeya ama uga hooseeya labada kale.	33%
C	Laba dhibcood ayaa Iska horimaanaya. Ardaygu wuxuu muujinayaa xoog iyo daciifnimo.	12%
E	Astaanta **E** waxay muujinaysaa kala duwanaanshaha buundooyinka ee aadka u daran. Ugu yaraan laba buundooyin ayaa ku kala duwan 24 ama wax ka badan marka loo eego qiyaasta da'da ee caadiga ah (SAS).	10%

©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.

Awoodaha iyo daciifnimada qaraabada

Iyada oo ku xidhan *Astaanta Kartida* ee ardayga, waxa jiri kara hal ama laba xaraf oo dheeraad ah oo ku xigaya naqshada kuwaas oo tilmaamaya wax kasta oo xogganaan iyo/ama daciifnimo ah oo ka muuqda buundooyinkooda baytariga. Maskaxda ku hay in kuwani ay la xiriiraan oo kaliya xirfadaha kale ee cunuggaas–ma aha kuwa ardayda kale.

Dhammaan astaamaha kuma jiraan xarfahan dheeraadka ah. Kuwa leh, halkan waxaa ah sida loo fasiro xarfahan:

V, Q, ama N oo ay ku xigto calaamada dheeriga ah (+) waxay muujinaysaa xoog la xidhiidha baytariga Afka, Tirada, ama Aan Hadalka ahayn, siday u kala horreeyaan.

V, Q, ama N oo ay ku xigto calaamadda laga jaray (–) waxay muujinaysaa daciifnimo la xidhiidha baytariga Afka, Tirada, ama Aan Hadalka ahayn, siday u kala horreeyaan.

Muunada fasiraada buundooyinka

Astaanta Kartida ee 4B (V+) macneheedu waa in stanine-ka dhexe ee ardaygu yahay 4 (celceliska) iyo in buundada ardaygu ee Baytariga Afka ah ay aad uga sarreysay (Sare) buundooyinka ardayga ee labada baytari ee kale. Waa kuwan tusaalooyin dheeraad ah oo ku saabsan astaamaha iyo fasiraaddooda:

Astaanta	Fasirka
9A	Dhibco aad u sarreeya guud ahaan saddexda baytari
8B (Q-)	Guud ahaan buundooyin aad u sarreeya laakiin daciifnimada Baytariga Tirada
2B (N+)	Guud ahaan ka hooseeya celceliska buundooyinka, laakiin xoog cayiman oo ah Baytariga Aan Hadalka Ahayn
5C (V+ N-)	Guud ahaan buundooyinka celceliska oo leh xoog cayiman oo ah Baytariga Afka ah iyo daciifnimo xagga Baytariga Aan Hadalka ahayn ah
8E (V-)	Guud ahaan buundooyin sare laakiin daciifnimo xad dhaaf ah oo xagga Baytariga Afka ah

Sidee baa xogta kartida **loo isticmaali karaa?**

Astaanta Kartida waa qalab gaar ah oo awood badan oo barayaasha, ardayda, iyo waalidiinta siiya macluumaadka ku saabsan kartida ardayga.

Iyadoo la isticmaalayo macluumaadka astaanta, macalimiintu waxay la qabsan karaan waxbarid ku salaysan hababka ugu fiican ee heer kasta oo kartiyeed iyo iney ku daraan ardayda kooxo kale kuwaas oo kaabaya oo kor u qaadi doona waxbarashadooda. Macallimiintu waxay sidoo kale isticmaali karaan xeelado la bartilmaameedsaday si ay u dhisaan meelo gaar ah oo ay ku caawiyaan ardayda si ay u xoojiyaan daciifnimadooda si ay u dhiirigeliyaan kobaca tacliinta.

©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.

Tusaale ahaan, ardayga ku wanaagsan xagga sababeynta hadalka wuxuu ka faa'idaysan doonaa ka hadalka ama wax ka qorista waxa uu baranayo, iyo arday ku wanaagsan sababeynta aan hadalka ahayn wuxuu ka faa'idaysan doonaa isticmaalka qaabab iyo wax kala rogid si uu u barto fikrado cusub. Ardeyga ku liita xagga hadalka ayaa laga yaabaa inuu ka faa'idaysto in tilmaamo loogu qoro sabuuradda si uu u tixraaco beddelki laga sugi lahaa inuu soo xasuusto tilmaamaha hadalka ah. Ardayga ku liita xagga qiyaasida tirada waxay u badan tahay inuu ka faa'idaysan doono isticmaalka sawirro iyo/ama ereyo si loogu sharraxo mashaakilka xisaabta.

Ka waalidiin ahaan, waxaan sidoo kale u isticmaali karnaa macluumaadkan si aan ugu taageerno carruurteena xirfadahooda wax-barashada iyo sababeynta guriga. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad aragto Agabyadeena Dheeraadka ah ee hoose si aad ugu isticmaasho xogta *Astaanta Kartida* si buuxda.

Ogeysiin muhiim ah oo ku saabsan buundooyinka imtixaanka

Cunuggaagu waa bini'aadam gaar ah, kaas oo leh sifooyin gaar ah oo aan la qiyaasi karin iyo dabeecado kuwaas oo qaabayn doona waxtarkooda adduunka. Waa muhiim in la fahmo in *CogAT*, in kasta oo uu waxtar ku leeyahay helidda kartida ardaydeenna, uu yahay kaliya hal qiimayn, natiijaduna way kala duwanaan kartaa iyadoo ku xidhan arrimo kala duwan oo dibadda ah. In kasta oo buundooyinkani yihiin tusaale qiimo leh oo muujinaya kartida tacliineed ee ardayga, maahan keliya cabbirka awoodaha iyo xirfadaha cunuggaaga. Noocyo badan oo kala duwan ee ah qiimaynada, dhibcaha xogta, iyo indho-indheynta ayaa waxaa isticmaala iskoolka cunuggaaga si uu u go'aamiyo baahiyahooda. Waxaan rajeyneynaa in *Astaanta Kartida* uu u adeego sida hal qalab oo qiimo u leh adiga iyo macallinka cunuggaaga si aad u taageertaan cunuggaaga inta uu wax baranayo oo uu u korayo awooddiisa buuxda.


Agabyo dheeraad ah

Sida Loogu Caawiyo Ardaygaaga Guriga

Sida Aad Shir Ula Galeyso Macallinka Cunuggaaga

Sida Loogala Hadlo Cunuggaaga Waxbarashadiisa

Wax ka ogaanshaha *CogAT* ee Waalidiinta (muuqaal) **CogAT.com**



©2024 Riverside Assessments, LLC. All rights reserved.